



Wararkii Ugu Dambeeyey ee Dirawal Yaraanta Ka Jirta Wadayaasha Basaska Iskuulada: Waxa La Baajiyey Dhowr Dariiq oo Basasku Mari Jireen; PPS Waxay Sii Wadaa Sidii Xal Loogu Heli Lahaa

Qoysaska iyo Ardayda Qaaliga ah ee PPS,

Mar labaad waad ku mahadsan tihii dulqaadkiina maadaama oo aan ka shaqeyneyno sidii xal ugu heli lahayn dirawal yaraanta basaska. Fadlan waxaad ogaataan in kooxadayadu ay raadinayaan xal kasta, haddii uu yahay mid yar ama mid weynba, sidii aan ardaydeena iyo qoysaskooda u siin lahayn addeegyada ugu fiican waqtigani adag ee aan ku jirno.

Iyadoo dirawal yaraanta waqtigan ay u egtahay inaan degdeg xal loogu helayn, waxaan ka shaqeyneynaa xalal dhowr ah oo ay ka mid yihiin wada hadalada heerkoodu yahay heer gobol oo lagu raadinayo taageero dheeraad ah, kordhinta in la isticmaalo baabuurta yaryar iyo addeegyada baabuurta la wadaago, qandaraas la siiyo addeegayaal bannaanka ka yimaada, iyo xalal kale oo cusub oo aan rajeyneyno inaan ugu dhawaaqi doono sida ugu dhakhso badan.

Iyada oo aan raadineyno badiil kasta, jidadkii ay basasku mari doonaan waxaa la hakiyey si ku meel gaar ah ama la baajiyey, qiyaas ah jidkiiba 10-15 jidadka, celcelis ahaan, **kuwaasi oo** maalin kasta aan jidadkaasi mari doonin. Haddaba iyadoo aan ku jirno xal u helida xaalad nasiib daradda ah, waxaan idiin ballan qaadeynaa inaan diirada saareyno sidii aan mudnaanta u siin lahayn maalin kasta addeegyada gaadiidka ardayda laxaadka dhiman iyo ardayda dugsiyada hoose sidii ay u heli lahaayeen addeegyadii basaska ay raaci jireen.

Sidii loo yareyn lahaa hubaal la'aanta jidadka la joojiyey iyo inay qoysasku helaan waqti ay ku qorsheetaan xalka badiilka ah ee gaadiidka ay isticmaalayaan, waxaan qaadaneynaa go'aan adag oo aan ku baajineyn/joojineyno jidadkan soo socda mustaqbalka soo socda:

| Dugsiga | Jidadka La Joojiye |
|---------|--------------------------------|
| Benson | 120, 133, 138, 139, 228 |
| Lincoln | 22, 24, 25, 26, 31, 32, 33, 34 |

Intaas waxaa sii dheer, jidadka hoos ku qoran oo dib loo hagaajiyey waqtiyadii ay ardayda laga soo qaadi jiray iyo waqtiyadii lagu dejin jiray:

| Dugsiga | Jidadka Isbedelka lagu Sameeyey |
|-----------------|---------------------------------|
| Alameda | 128, 130 |
| Beaumont | 130 |
| Duniway | 24 |
| Harrison Park | 133 |
| Jackson | 22, 24, 32, 213 |
| Kelly | 302 |
| Ockley Green | 106, 128 |
| Odyssey | 22 |
| Roseway Heights | 33 |
| West Sylvan | 22 |
| Woodstock | 120 |

Macluumaadka cusub ee jidadka waxaad ka helli doontaa saacadu marka ay tahay 5:00 galabnimo [shabakadayada gaadiidka](#) maalinta Jimcaha.

Waa maxay waxyaabaha kale PPS qabaneysa sidii ay wax uga qaban lahayd darawal yaraantan wadayaasha basaska soo food saartay?

Waxaan ka shaqeyneynaa xalal dhowr ah, oo ay ka mid yihiin:

- In la yareeyo tiradayada basaska waaweyn ee mara jidadka laga bilaabo 140 ilaa 101;
- In la kordhiyo isticmaalka baabuurta yaryar oo qandaraas la siinayo qandaraasleyaal bannaanka ka imanaya
- Wada hadalo ka dhexeeya ganacsatada iyo madaxda gobolka oo lagaga hadlayo sidii shaqaalaha loo heli lahaa
- In la siiyo taageero dhaqaale qoysaska ay saameysay jidadka basasku marayeen ee la baajiyey
- In la isticmaalo teknoolajiyada la saaxiibka ah qoyska sidii la iskugu duwi lahaa dadaalada baabuurta la wadaago

Ugu dambeyn, **waxaan sii wadnaa shaqaaleysiinta darawalo cusub oo ah wadayaasha basaska!** Haddii adiga ama qof xiiseynaya inuu ka mid noqdo kooxdayada, fadlan si degdeg ah ha uu soo codsado.

Mushaharka saacadii ku bilaabay: \$22.00 - \$27.95/saacadii **Gunooyinka Bilowg ah :** \$2,500 - \$6,500

Hadda Soo Codso : WorkatFirst.com

Su'aalo? La soo Xiriir Paige oo aad ka helayso paige.mulcahy@firstgroup.com

Mar labaad waad ku mahadsan tiihin dulqaadkiina iyo fahamkakiina. Waxaad idinla wadaagi doonaa xog dheeraad ah todobaadka soo socda.

Dan Jung

Sarkaalka Madaxa Hawlgalada

Teri Brady

Agaasiimaha Gaadiidka